



Miyey Tahay In Dhammaan Ardayda Da'doodu tahay 12 sanno iyo Ka Weyn ee PPS Laga Tallaalo Xanuunka COVID-19? Nagala Soo Qeybgal Si aad Noola Wadaagto Aragtidiina

Qoysaska iyo Ardayda Qaaliga ah,

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay miisaanka saaraayaan saameynta ay yeelaneyso in loo baahan yahay dhammaan ardayda da'doodu tahay 12 sanno iyo ka weyn in laga tallaalo xanuunka COVID-19.

Bishii Sebtamber 28keedii, Golaha Waxbarashada PPS waxay ka dhageysteen khabiirada caafimaadka dadweynaha iyo dhakhaatiirta caruurta sidii tixgalin loo siin lahaa iyo waxa ka dhalan karo inay tallaalan yihiin ardayda wax ka baraneysa dusgiyadu, sida xanuunka COVID-19. Wuxaan idinku soo dhaweyneynaa inaad ka daawataan wada hadaladaasi [halkani](#) iyo idinka oo ka akhriyaya [warbixinta shagaalahayaga](#) taasi oo iftiimineysa muhiimada uu leeyahay mawduucani ka hadalkiisu.

Inaga oo sii wadi doono sidii aan uga wada tashan lahayn go'aankani muhiimka ah, waxaan jecelnahay inaan idin dhageysayno- haddii aad tiihin qoysaskii iyo ardaydii Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS). Nagala soo qeybgal mid ka mid ah saddex kulan oo arrintan lagaga hadlayo si aad u muujisaan aragtidiina ku saabsan mawduucan:

- **Tallaado, Oktoobar 19 (Muuq-baahiyaha):** Qoysaska iyo Ardayda
- **Khamiis, Oktoobar 21 (Muuq-baahiyaha):** Ardayda Dugsiyada Hoose iyo Dugsiyada Sarre PPS
- **Khamiis, Oktoobar 21:** Qoysaska iyo Ardayda (Isbaanish) Goobtu Lagu Qabanayo Waa Dugsi

Waxaan heli doonaa macluumaad dheeraad ah toddobaadka soo socda.

Haddii aanad nala wadaagi karin aragtidiina inta lagu jiro kulanka, waxaan idinku dhiirigalineynaa inaad ku soo gudbisaan qoraal dhinaca faalada dadweynaha ee ku saabsan mawduucan idinka oo isticmaalaya agabkayaga addeegyada dadka nala soo xiriira lagu caawiyo ee "[Aynu Wada Hadalno](#)".

Mahadsanidin.